TALOOYINKA WAALADIINTA

Maajo 21, 2015

Dhibaato malahan da'dooda, halkaan waa talaabooyinka qaarkood oo carruurta aad uga ilaalisid xashiishka.

MA XAAN KA OGAANAYAA IN CARRUURTA KA ILAALIYO XASHIISHKA, XITAA HADII UUSAN OOLIN XASHIISH GURIGA?

Kala hadal carruurta yar in aysan waxba cunin ama cabin ogolaansho laa'nteeda. Tani waxay muhiim u tahay marka ay joogaan guryaha dadka kale.

MAXAAN KA OGAANAYAA IN AAN KA ILAALIYO CARRUURTA XASHIISHKA HADIIBA AAN QORSHEEYO IN AAN ISTICMAALO XASHIISH?

Hub in uu jiro qof kale oo si badbaado ah u daryeeli karo carruurta. Qofna badbaado uma ahan qofka marqaansan in uu daryeelo carruurta.

Ha u ogolaanin in gurigaada lagu cabo ama carruurta dhinaceeda. Cabida xashiishka badbaado ma ahan. Wuxuu leeyahay isla kiimikada sababto kansarka sida sigaarka tubaakada.

Marqaansanaanta ama sarqaansanaanta waxay ka dhigi karaan hawlaha qaarkood halis badan.

- Gaari ka xeynta adigoo marqaansan badbaado uma ahan darawalka ama rakaabka. Usheeg carruurta iyo dhaliinta in aysan raacin gaari hadii darawalka marqaansanyahay.
- Badbaado uma ahan carruurta yar in ay kula saaxdaan adiga, gaar ahaan hadii aad marqaansantahay.

SIDEE AYAAN SI BADBAADO AH U KEYDIN KARAA XASHIISHKA?

Ku keydi dhammaan alaabaha xashiishka goob xeran. Hubi in carruurta aysan arki karin ama gaari karin goobta xeran. Ku haay xashiiska kartoon adag oo carruurta aysan furi karin ee dukaanka laga helo.

Sida aad u keydineysid waa in ay isbedeshaa sida carruurta ay u korayaan. Ka keydinta badbaadada ah ee carruurta yar agagaarkooda laga yaabo in aysan joojin carruurta weyn ama dhaliinta.

MAXAA DHACO HADII CARRUURTA SI LAMA FILLAAN AH U CUNAAN AMA U CABAAN XASHIISH?

Xashiiska aad ayuu u xanuunsiin karaa carruurta. Dhibaato ayuu raadiyaa oo socod ah ama fadhiya, wuxuu bilaabayaa hurdo ama neefsiga ku adkaaneysaa.

Hadii aad walaacsantahay, u yeer qadka xakameynta sunta sida ugu dhaqsiha badan oo suurtagalka ah. Wicitaanka waa bilaash iyo si dhaqso ah ayaa laguu caawinayaa. **1-800-222-1222.**

Hadii xanuuno ay daranyihiin, soo wac 911 ama booqo qolka xaaladaha degdega.

U AHOW KU DAYASHO WANAAGSAN CARRUURTA.

Deji tusaale wanaagsan iyo aasaas deegaan badbaado ah.

Talaabooyinka ayaa ka dhawaq dheer erayada. Ha isticmaalin xashiish, qamri ama maandooriyaha kale ee carruurta ka ag dhaw.

KALA HADAL DHALINYARADA XASHIISHKA SI AY UGA CAAWISO FAMAH WANAAGSAN OO HALISAHA

Si taxadar leh u dhageyso iyo wanaagsanow. Sheekada ka dhig mid furan si markaas ay kuula imaadaan su'aalo. Ogaanshaha in ay su'aalo ku weydiin karaan waxay ka caawisaa dhalinyarada in ay sameeyaan go'aano wanaagsan mustaqbalka.

Waxa aad ka hadleyso laga yaabo in ay ku xirantahay da'dooda.

XASHIISHKA WUXUU WAXYEELAA KORIINKA MASKAXDOODA

- Xashiiska wuxuu ku adkeyn karaa barashada, mararka qaar isbuucyo markaad joojiso kadib.
- Dhibaatooyinka barashada way sii korodha inta badan ee xashiisha la isticmaalo.
- Dhalainyarada bilaabay isticmaalka xashiishka waxay u badanyihiin in ay ku noqoto balwad mustaqbalka.

Dhiirogeli dhalinyarada si loo badbaadiyo maskaxdooda iyagoon isticmaalin xashiishka.

XASHIISHKA WUXUU HOR ISTAAGI KARAA HAMILOOYINKA WADADOODA

- Weydii riyooyinkooda iyo ku caawi in ay ku xirmaan waxa ay rabaan in ay gaaraan hamiladooda.
- Daacad ahaw. U sharax wanaag ku sameynta dugsiga iyo ka joogitaanka dhibaatada waxay ku caawin kartaa in ay gaaraan hamiladooda.

XASHIISHKA DHIBAATO AYUU GALIN KARAA

Jabinta sharciyada qoyska iyo bulshada: U dajinta sharciyo cad dhalinyarada. La wadaag in walaalaha yar iyo dariska ay u arkaan iyaga sida ku dayasho, marka ma ahan in ay isticmaalaan xashiish.

- **Jabinta sharciyada dugsiga ama hawlaha dugsiga ka dib:** Dhalinyarada laga yaabo in loo gudbiyo la talinta daroogada, ganaaxa, laga saaro ama wajaho xukun.
- **Jabinta sharciga Colorado:** Dhalinyarada waxaa laga yaabaa in ay helaan Ku soo oogid Yar oo Haysashada ah. Tani waxay u hogaamin kartaa ganaaxyo, adeega bulshada, waxbarashada xadgudubka maandooriyaha, waayitaanka shatiga gaari kaxeynta iyo eedeynta edeb daro ama dambi.
- **Jabinta sharciga federaalka:** Maadaama xashiishka uu weli ka yahay sharci daro meel ka baxsan Colorado, dhalinyarada lagu soo eedeeyay xashiishka ma helayaan deeqda dhaqaale oo ay isaga caawiyaan lacagta kuliyada.

LA HADAL WAALIDKA

Ku dhiirogeli in ay u noqdaan ku dayasho wanaagsan iyo ay ka lahadlaan dhalinyarada halisaha isticmaalka xashiishka.

Booqo Colorado.gov/Marijuana oo illaha gaarka ah ee waaladiinta.

WALAACYADA WAALADIINTA ISTICMAALO XASHIISHKA?

Kala hadal walaacyadaada. Xasuusi in ay siiyaan deegaan badbaado ah, oo lagu cabi karo iyo ku keydinta xashiishka goob qufulan
oo carruurta aanan arki karin ama gaari karin.

Hadii aadan hubin hadii isticmaalka xashiishka uu walaac u yahay fayo qabka canuga, la xiriir Waaxda Adeegyada Insaanka deegaankaada.

Hadii aad ka shakiso in canug uu ku xadgudbo ama la dayacay (tusaale. in caafimaadka ama fayoqabka canug ay halis ku jirto), ku soo wargeli walaacyadaada Qadka ku Xadgudubka Carruurta Colorado iyo Dayacaada: 1-844-CO-4-KIDS.

Waxaad wax badan oo ku saabsan aastaamaha canuga lagu xadgudbay ka baran kartaa iyo canuga la dayacay Waaxda Adeegyada Iinsaanka Colorado.

Tababarada wargelinta qasabka ah ee Colorado, booqo coloradocwts.com/tababarka-bulshada.

CDPHE CO
COLORADO
Department of Public Health & Environment